

# Badbaadada Goobaha Dabaasha ee Vermont

Juun 2022



Ayada oo goobaha lagu dabaasho bixiyaan fursado madadaalo oo cajiib ah, haddana ku dabaalashada goob aan si wanaagsan loo maamulin waxay keenaysaa khataro. Go'aan qaadashada wanaagsan, iyo xoogaa qorshayn ah, ayaa mar kasta ka hortagi karta masiibo soo socota.

## **Xasuusnow in biyuhu yihiin kuwo wax kasta laga filan karo:**

Roobabka xooggan, waxyaabaha burburay ee sabbaynaya ama ku dhex jira, ama xataa wakhtiyada dhaadheer ee kulaylka iyo abaarta ah waxay badali karaan hirarka, waxay saamayn karaan moolka waxayna wax ka badali karaan qaab dhismeedka gunta hoose ee biyaha ama si dhumucda biyaha. MAR KASTA samee feejignaan marka aad ku dabaalanayso biyaha dabiiciga ah.

## **Ka war hay meelaha godan ee biyaha ee khatarta ah:**

Sanadihii ugu danbeeyay, inta badan dadkii ku qarqamay biyuhu waxay ka dhacday Huntington Gorge, Cobb Brook, Bolton Potholes, Dog's Head Falls, Saxons River, Westminster Hamilton Falls, iyo Newhaven River. Si gaar ah u feejignow marka aad ku damaashaadayso goobahaan.

## **hubi biyaha iyo xaaladaha cimilada:**

Wabiyada buux dhaafay iyo hirarka xowliga ku socda waxay abuuri karaan xaalado khatar ah intii maalmo ah ka dib marka roob xooggan uu da'o. Haddii ay dhawaan roobab xooggan da'een, xaaladuhu waxay noqon karaan kuwo khatar ah, xaataa haddii cimiladu tahay mid aan daruuro lahayn, qorrax ah, maalin xasiloon.

## **La soco hareerahaaga:**

Marka aad timaaddo goobta dabaasha, eeg hirarka. Dhegayso inuu jiro cod dheer oo biyaha socda ah oo aan caadi ahayn. Eeg dhadaba ay waxyaabaha burburay marayaan marka ay dul sabbaynayaan biyaha qulqulaya. La soco xaaladaha hana qaadan fursadaha aan loo baahnayn.

## **Ha dabaalan kaligaa:**

Mid kamid ah xeeladaha ugu ammaanka ah waa inaad mar walba saaxiib la timaaddaa. Ku qarqamidda biyuhu waxay qaadataa kaliya dhowr daqiqiyo, waxaana laga yaabaa in gurmadka degdega ah uu kaa fogyahay 15-20 daqiqiyo. Inaad kaligaa dabaalato marna fikrad wanaagsan maahan, laakiin khaasatan kuma sii jirto marka lagu dabaalanayo biyaha dabiiciga ah

## **Haku dabaalan meel ka hooseysa, ama ka sareysa, goobaha biyo dhaca leh:**

Hirarka waaweyn waxay dadka ka tuuri karaan goobaha biyo dhaca leh, hirarka hoosena waxay qofka dabaalanaya ku xanibi karaan biyaha hoostooda. Ka fogow ku dabaalashada qaybta kore, ama hoosta goobaha biyo dhaca leh.

## **La soco xaqiqooyinka awoodahaaga:**

Marka laga tago madadaalada banaanka waa inaad fahamtaa awoodahaaga, iyo inaadan naftaada ama nafta dadka kale khatar galin adiga oo galaya khataro dayacaad ah. Daacad ka ahow naftaada arrimaha ku saabsan awooddaada, kartiyahaaga iyo ciladahaaga. Naftaada ha kalifin, hana aaminin in markasta badbaadintu doorasho kuu tahay.